

Alberta waxay dedejineysaa ballamaha labaad

Juun 01, 2021

Dhowaan dhamaan dadka reer Alberta waxay awoodi doonaan inay helaan qiyaas labaad oo tallaah ah, iyagoo gacan ka geysanaya sidii si buuxda looga difaaci lahaa dhammaan reer Alberta KOOFID-19.

Bixinta tallaalka Alberta waxay sii waddaa inay gaarto heerarka cusub, iyadoo in ka badan 2.8 milyan oo qiyaasood la qaatay ilaa maanta iyo 63.4 boqolkiiba dadka reer Alberta da'doodu tahay 12 iyo wixii ka weyn ugu yaraan hal qiyas qaateen.

Reer Alberta waxay awood u yeelan doonaan inay jadwal u sameeyaan ballamaha labaad si ay u helaan amarkoodii ugu horreeyay.

- Qof kasta oo la tallaalo bisha Maarso ama ka hor ayaa ballansan kara qaadashadiisa labaad laga bilaabo Juun 1.
- Qof kasta oo la tallaaley Abriil wuxuu ballansan karaa tallaalkii labaad laga bilaabo Juun 14.
- Qof kasta oo la tallaaley bisha Maayo wuxuu qabsan karaa balantiisa labaad laga bilaabo Juun 28.

Hal qaadasho oo ah tallaalka KOOFID-19 ayaa ugu yaraan boqolkiiba 80 ka difaacaysa natiijooyinka daran, oo ay ku jiraan isbitaal dhigidda iyo dhimashada. Si kastaba ha noqotee, qaadasho labaad ayaa loo baahan yahay si loo helo ka hortagga ugu fiican uguna dheer ee fayraska.

Alberta waa hogaamiye qaran ee qiyaasaha labaad, iyadoo boqolkiiba 10.4 dadka uqalma ee reer Alberta horeyba si buuxda loogu ilaaliyay qaadashada laba qiyaasood.

qabsashada ballanta labaad

Meesha ay suurta gal tahay, Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) iyo farmashiyaasha kaqeybgalaya ee qaatay qiyaastii koowaad waxay laxiriiri doonaan dadka reer Alberta si ay uxasuusiyaan inay uqalmayaan qiyaastooda labaad.

Si kastaba ha ahaatee, reer Alberta uma baahna inay sugto in lala soo xiriiro si ay ballan u qabsadaan markay u qalmaan. Reer Alberta waxay dooran karaan inay dalbadaan qadar labaad meeshii ay rabaan in laga talaalo.

Balan qaadashada qiyaasaha labaad waxaa lagu sameyn karaa khadka tooska ah iyadoo la adeegsanayo aalada khadka tooska ahee Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS), iyadoo la wacayo 811 ama farmasiyada ka qaybgalaya iyo xafiisyada dhakhaatiirta. Qiyaaso labaad ayaa la heli doonaa marka ugu horaysa ee la soo bixiyo.

In kastoo inta u dhexeysa qaadashada koowaad iyo labaad ay bilaaban doonto 12 toddobaad, Alberta waxay hadda awood u yeelan doontaa inay bixiso ballamo labaad oo ah ballamo u dhexeeya xilliyadii hore, iyadoo la bixinayo ayaa bixinta tallaalka weli deggan.

- Fisar (Pfizer) iyo Moderna, muddo qaadashada u dhaxeysa ayaa hoos loo dhigi doonaa ugu yaraan saddex illaa afar toddobaad maadaama sahayda diyaar tahay oo aan ka shaqeyno kooxaha u qalma.
- Astarasenika (AstraZeneca), muddo qaadashada u dhexeysa ayaa hoos loo dhigi doonaa muddo ugu yaraan lagu taliyay oo ah sideed toddobaad ama ka badan si wax ku oolnimada ugu wanaagsan loo helo.

AstraZeneca

Dadka reer Alberta oo qaatay qiyaasta Astarasenika (AstraZeneca) bishii Maarso ama ka hor ayaa hadda ballansan kara ballamaha labaad. Qof kasta oo qaatay Abriil ama Maayo waa inuu sugaa illaa siddeed usbuuc ay ka soo wareegtay markii ugu horreysay ee ay qaateen ka hor inta aan la ballansan.

Reer Alberta ee helay qiyaasta koowaad ee Astarasenika (AstraZeneca) waxay yeelan doonaan doorasho:

- Qabso ballanta labaad ee Astarasenika (AstraZeneca) adoo tagaya bogga ballansashada Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) ee khadka tooska ah, wacaya 811, ama tagaya farmashiye ku taxan khadka tooska ah ee Alberta Buluu Koros ([Alberta Blue Cross website](#)).

Qabso ballanta labaad ee tallaalka mRNA adoo u maraya farmasiyada ka qayb qaadanaya ama Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS).

Qiyaasaha ugu horreeya

Balan qabshada qaadashada qiyaasaha ugu horreeya ayaa weli leh mudnaanta koowaad. Dadka reer Alberta aan wali helin qiyaasta koowaad ee difaaca tallaalka waxaa lagu dhiirigelinayaa inay qabsadaan ballantooda sida ugu dhaqsaha badan.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa faafida KOOFID-19 iyada oo ilaalinaysa nololaha iyo habnololeedka iyada oo tilaabooyin sax ahna loo u mareysa, joogtaynta ganacsiyada yaryar iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

Xogta la xiriirta

- Qabso ballanta tallaalkaaga KOOFID-19 ([Book your COVID-19 vaccine appointment](#))

Warbaahinta kala duwan

- Daawo shirka wararka ([Watch the news conference](#))

Weydiimaha warbaahinta

[Jerrica Goodwin](#)

587-988-3278

Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha

[Tom McMillan](#)

780-422-4905

Kaaliyaha Agaasimaha Isgaarsiinta, Caafimaadka

Si aad u hesho ilo badan oo dowladda loo turjumay, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.